



**DIKREETOYINKA**

**MADAXWEYNAHA:**

326

2) CAFIS MADAXWEYNE,

XEER MADAXWEYNE Lr:

327

0249/072012

3) CAFIS MADAXWEYNE,

XEER MADAXWEYNE Lr:

330

0252/072012

4) Fulinta Siyaasadda Maamulka  
Gaadiidka Dawladda

**QAYBTA SADEXAAD:**

**DIGREETOYINKA,**

**WAREEGTOOYINKA,**

**AMARADA IYO XEER**

**NIDAAMIYAYAASHA**

**WASIIRADA, IWM**

5) Shuruudaha Cashuur-Dhaafka

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &**

**GO'AANADA MAAMUL**

*Sooma bixin*

**QAYBTA SHANAAD:**

**OGEYSIISYADA**

*Sooma bixin*

**QAYBTA KOWAAD:**

**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER**

**NIDAAMIYAYAASHA:**

# **XEER MADAXWEYNE Lr:**

## **0250/072012**

**Dhaqan-galka Wax ka Beddelka iyo  
Kaabista Xeerka Doorashooyinka  
Madaxtooyada iyo Golayaasha  
Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 (Lifaaqa  
Afaraad)**

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku  
suntan GW/G/KF-18/561/2012 ee 18/07/2012  
ee Go'aanka Ansixinta Wax ka Beddelka iyo  
Kaabista Xeerka Doorashooyinka  
Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka  
Xeer Lr. 20/2001 (Lifaaqa Afaraad);

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Wax ka Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 (Lifaaqa Afaraad).

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Ref: GW/G/KF-18/561/2012

Date: 18/07/2012

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Wax ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (No.20/2001) Lifaaqa Afaraad**

**GOLAHA WAKIILADA JSI**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 9aad, 22aad, 83aad, iyo 111aad ee Dastuurka JSI

**MARKUU TIXGALIYAY:** Soo jedinta Xeer Madaxweyne ee ku taariikhaysan 18/06/2012 ee sumadiisuna tahay JSI/M/SHGW/081-1150/062012 kuna saabsana waxka bedelka iyo kaabista lifaaqa Afaraad xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (Lr 20 /2012) lifaaqiisa Afaraad

**MARKUU U CODEEYAY:** wax ka bedelka iyo kaabista lifaaqa Afaraad xeerka Doorashooyinka madaxtooyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (Lr 20 /2012), ay ku soo sameeyeen golaha Guurtidu kal-fadhigii 18<sup>aad</sup> ee fadhigiisii 15<sup>aad</sup> ee Golaha 016/07 /2012 oo ay goob joog ahaayeen (44) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

**WUXUU**

Cod aqlabiyad ah Labaatan iyo sadex(23) cod oo gacan taag ah ku ansixiyay Wax ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Degaanka Xeer (No.20/2012) Lifaaqa Afaraad

halka ay ka diideen (19) Mudane, kana aamuseen (1) Mudane, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

Crisaag Siciid Ayaanle  
Loghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

Craxmaan Maxamed Cftaahi (Cirro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSI



## WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA LIFAAQA U AH

### XEERKA DOORASHADA MADAXTOOYADA IYO GOLEYAASHA DEEGAANKA (XEER Lr. 20/2001)

#### LIFAAQA 4AAD

*Wax-ka-beddelka iyo/ama Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa uu saamayn ku yeelanayaa Qodobbada 1, 5, 6, 16, 22, 23, 24, 26, 27, 28, 29, 30, 32, 37, 42, 45, 46, 47, 51, 52, 54, 57, 58, 65, iyo 66 ee Xeer Lr. 20/2001 iyo Lifaagyadiisa 1aad, 2aad iyo 3aad.*

#### Qodobka 1aad

##### Macnaha Erey-bixinta

Qodobka 1aad ee Xeerka oo ku saabsan macnaha erey-bixinta, ereyga:

**“Liis/Liisaska”:** Waxaa loola jeedaa murashaxiinta uu soo gudbiyay Xisbi/Urur oo u qoran si taxane ah, iyadoo aanay kala hormarinta magacyadu wax saamayn Sharci ah yeelanahaynin;

#### Qodobka 5aad

##### Shuruudaha Codbixiyaha

***Waxaa la tirtiray:***

Qodobka 5aad ee Xeerka oo ku saabsan shuruudaha codbixiyaha, Faqraddiisa 4aad ee Lifaaqa 1aad oo dhigaysa: ***“Waa inuu yahay cod-bixiye ka diiwaan-gashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu ka mid ahayn hawlwadeennada xafiiska goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta ama ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta codbixinta”.***

## Qodobka 6aad

### Xuquuqda Codbixiyaha

#### ***Waxaa la tirtiray:***

Qodobka 6aad ee Xeerka oo ku saabsan Xuquuqda Codbixiyaha, Faqraddiisa 1aad ee Lifaaqa 1aad oo dhigaysa: ***“Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaan-gashan yahay”***.

## Qodobka 16aad

### Xafiiska Goobta Cod-bixinta

#### ***Waxaa la tirtiray:***

Qodobka 16aad, Faqraddiisa 1aad ee Lifaaqa 2aad oo ku saabsan tirada hawl-wadeennada Xafiiska Goobta Cod-bixinta oo ku kordhiyay xubin shanaad oo noqonaysa:

***“Mas’uulka uruurinaaya cabashooyinka islamarkaana tilmaamaaya cod-bixiyeyaasha (help desk officer)”***

Waxa Qodobka 16aad Faqradiisa 1aad loo akhriyayaa sida uu dhigaayo Xeer Lr. 20/2001 oo ah: ***“Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashadu wuxuu ka koobmi doonaa Gudoomiye iyo laba hubiye. Hubiyaha ugu da'da weyn ayaa noqonaya gudoomiye xigeen. Waxa kale oo uu yeelanayaa xoghayn”***.

## Qodobka 22aad

### Habka Doorashada

Waxaa la beddelay Qodobka 22aad, Faqraddiisa 1aad ee Lifaaqa 3aad ee Xeerka oo dhigaaya:

***“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaan, waa in uu Komishanka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan***



***doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in Komishanku siiyaa murashax kasta astaan u gaar ah”***

Waxaana loo beddelay:

***“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu Komishanka Doorashooyinka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku sar-go’an tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah oo ku salaysan Habka Liistada Furan (Open List Sytem). Waxa Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu siin doonaa murashax kasta Lambar u gaar ah oo u noqon doona summad”.***

Waxaa la tirtiray Qodobka 22aad Faqraddiisa 2aad ee Xeerka, laynka labaad oo u qoran:

***“Tirada dadka liiska lagu qorayaa waa in aanay ka yaraan laban-laab xubnaha laga doonayo in degmo kasta laga soo doorto”***

### **Qodobka 23aad**

#### **Qaabka Soo Bandhigidda Murashaxiinta**

Waxaa la tirtiray Qodobka 23aad, Faqraddiisa 3aad ee Xeerka oo dhigaysa:

***“Sida ay murashaxiintu liiska ugu kala horeeyaan ee la isugu xigsiiyey ayaa loo aqoonsanayaa in loo soo kala doortey ururka/xisbiga gudihisa”.***

## Qodobka 24aad

### Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta

Waxaa la beddelay Qodobka 24aad, Faqraddiisa 1aad, 2aad iyo 3aad ee Xeerka oo dhigaaya:

- 1. Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.**
- 2. Xisbi/ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore.**
- 3. Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, hase yeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo**

Waxaa lagu beddelay:

**“Lambarrada murashaxiinta ee Ururrada/Xisbiyadu waa in ay kala duwanaadaan marka lasoo bandhigaayo, iyadoo la raacaayo habka uu Komishanku usoo dhigay”.**

## Qodobka 26aad

### Qabashada Liisaska Murashaxiinta

Waxaa la beddelay Qodobka 26aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerka oo tilmaamaysa:

**“Liistooyinka murashaxiinta Madaxweynaha & ku xigeenkiisa waa in la geeyo xafiiska Komishanka, kuwa murashaxiinta degaanadana la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6da galabnimo maalinta 45aad intaanay cod-bixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman xeerka”.**

Waxaa loo beddelay:

***“Iyadoo Liistooyinka Murashaxiinta Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka sidoodii loo daayay, Liistooyinka murashaxiinta Goleyaasha deegaanka waa in la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6da galabnimo maalinta 75aad intaanay cod-bixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman Xeerka”.***

### **Qodobka 27aad**

#### **Sheegidda Liisaska Murashaxiinta**

Waxaa la tirtiray Qodobka 27aad, Faqraddiisa 3aad, laynka 2aad oo odhanaaya: **“Waa in suuqa lala maro oo codbaahiye lagu sheego Liisaska Murashaxiinta”.**

### **Qodobka 28aad**

#### **Ololaha Doorashada**

Qodobka 28aad ee Xeerka oo ku saabsan Ololaha Doorashada, Qodobka 28aad , Faqradda 2aad ee Lifaaqa 2aad iyo Qodobka 28aad , Faqradda 3aad ee Lifaaqa 3aad oo dhamaantood ku saabsan Ololaha Doorashada waxbaa laga beddelay waxaana lagu kordhiyay Faqrad 3aad oo u qormaysa sidan:

- 4) Ololaha Doorashada Goleyaasha Deeegaanka ee xilligan ay Xisbiyada/Ururradu tartamayaan waxa uu noqonayaa muddo dhan affar todobaad oo hal maalin la’ (27 maalmood). Waxa uu Ololuhu bilaabmayaa 29 maalmood ka hor maalinta doorashadu ay dhacayso, waxaanu dhammaanayaa 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Jadwalka Ololaha Doorashada waxaa soo saaraaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.***

### **Qodobka 29aad**

#### **Qabashada Shirarka iyo Bannaan-baxyada**

Qodobka 29aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerku wuxuu Duqa Magaalo siinayaa xaqaa uu ku mamnuuci karo

bannaan-bax, haddii uu ku qanco inuu wax-yeellaynayo caafimaadka iyo xasilloonida guud.

Waxa Qodobkaas loo beddelay:

***“Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu diyaarinayaa soona saarayaa shaxda isu-soobaxyada iyo dhoollo-tusyada qorshaysan ee Xisbiyada/Ururrada ee muddada Ololaha Doorashada, oo Xisbiyada/Ururrada loogu goondeeyey tiro maalmo ah oo is-le’eg”. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiyeyaasha Gobollada iyo Degmooyinka iyo Duqa Magaalada waxaa ku waajib ah in ay ku dhaqmaan shaxda ay soo saareen Komishanka Doorashooyinka Qaranku xilliga ololaha doorashada.***

Waxaa la beddelay Qodobka 29aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeerka oo tilmaamaysa:

***“Magaalo ama tuulo laguma wada qaban karo maalin qudha wax ka badan laba shir iyo banaan-bax”***

Waxaa loo beddelay:

***“Magaalo ama tuulo laguma wada qaban karo maalin qudha wax ka badan hal shir iyo banaan-bax”***

### **Qodobka 30aad**

#### **Muuqaalka Boodhadhka**

Waxaa la beddelay Qodobka 30aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerka oo tilmaamaya:

***“Muuqaalka boodhadhka iyo waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada waa in la geeyo xafiiska Gudoomiyaha degmada 48 saac***

**ka hor intaan shaaca laga qaadin. Mana jirto wax cashuur ah oo laga bixinayo arrintaas”.**

Waxaa lagu beddelay:

**“Muuqaalka boodhadhka, waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada iyo farriimaha ololaha doorashada ee Xisbi/Urur/Murashax waxaa oggolaanaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka islamarkaana joojinaaya haddii ay kasoo hor jeedaan Xeerarka iyo Anshaxa Guud. Mana jirto wax cashuur ah oo laga bixinayaa”.**

### **Qodobka 32aad**

#### **Wakiillada Axsaabta/Ururrada**

Qodobka 32aad, Faqraddiisa 3aad ee Xeerka iyo Lifaqa 2aad oo ka hadlaaya wakiillada Xisbiyada/Ururrada waxaa loo beddelay sidan:

**“Magacyada wakiillada Xisbiyada/Ururrada waa in la geeyo Komishanka ama Xafiisyadiisa 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta”.**

4. Waxaa lagu soo xulayaa wakiillada Axsaabta/Ururrada Shuruudaha hoos ku xusan:
- b) Waa in uu yahay/tahay muwaadin Somaliland u dhashay;
  - t) Waa in aanay/aanu da’diisu/da’deedu ka yarayn 25 jir sannadka doorashada la qabanayo;
  - j) Waa in uu/ay wax qori karo/karto waxna akhriyi karo/karto;
  - x) Waa in uu yahay/tahay qof xilkas ah oo dhaqan toosan.

## **Qodobka 37aad**

### **Qalabka Xafiiska Doorashada**

Waxaa la tirtiray:

Qodobka 37aad, Faqraddiisa 1aad (l,m,n), 2aad (f), 3aad, iyo 5aad (a, b) ee Waxka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Lifaaqa 2aad oo dhigaysa in Qalabka Xafiiska Doorashada ee Goobta la dhigo:

- l) Liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha loo qoondeeyay in ay codkooda ka dhiibtaan goobta codbixineed;
  - m) Mastarad aanu dhererkeedu ka yaraanin khaanadaha liiska ee codbixiyaha macluumaadkiisu ku qoran yahay;
  - n) Aalad gaar ah oo lagu dalooliyo kaadhka codbixiyeyaasha (special instrument for punching voter's cards)".
  - 2) (f) Liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha degmada/gobolka
- 5)(a) Komishanku wuxuu tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta codbixinta ku jaangoynayaa tirada cod-bixiyeyaasha goobta cod-bixinta ee ku cad liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha goobtaas codbixineed oo lagu daray tirada dadka ka hawlgelaya goobta cod-bixinta oo ka kooban hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixinta.

Qodobka 37aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka, Farqadda 5aad, xarafka (b) iyo (c) waxaa loo beddelay sidan:

- b) ***Komishanku wuxuu goob kasta oo cod-bixineed u diyaarinayaa waraaqo codbixineed oo dheeraad ah oo aanay tiradoodu ka badnayn 2% tirada waraaqaha ee Komishanku u qoondeeyay goobta, lambarradooda iyo goobaha cod-bixineed ee loo kala dirayana lagu qorayo diiwaan gaar ah oo Komishanka Doorashooyinka Qaranku leeyahay; waxaana goobta loogu ridayaa baqshad xidhan oo gaar ah oo lagu rido sanduuqa doorashada ee goobta cod-bixineed.***
- c) ***Waraaqaha dheeraadka ah waxa loo adeegsanayaa oo keliya beddelaadda waraaqaha cod-bixineed ee xumaada intaan lagu codeyn, taas oo ay waajib tahay in ay ku wada qancaan gudoomiyaha goobta iyo wakiilada Axsaabta/Ururrada u jooga goobta codbixinta. Mar kasta oo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah lagu codeeyana waa in la diiwaan-geliyaa asbaabaha kalifay.***

### **Qodobka 39aad**

#### **Habaynta Liisaska Rasmiga ah iyo Goobaha Codbixineed**

Waxaa la tirtiray:

Qodobka 39aad, Faqraddiisa 3aad ee Lifaafa 2aad oo u qoran sida:

***“Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxay qoraal ahaan u kala horreynayaan siday xuruuftu u kala horreyaan iyadoo laga duulayo magacooda 1aad haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2aad, haddii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3aad, haddii ay kaas ka sinmaanna kooda 4aad”.***

## **Qodobka 42aad**

### **Xafiiska Goobta Codbixinta**

Waxaa la tirtiray:

Qodobka 42 (1) (a) ee Lifaaqa 2aad oo tilmaamaysa in:

***“Mas’uulka ururinaaya cabashooyinku uu ka mid noqdo shaqaalaha Xafiiska Goobta cod-bixinta”***

## **Qodobka 45aad**

### **Tallaabooyinka Ka Horreeya Cod-bixinta**

Waxaa la tirtiray Qodobka 45aad, faqraddiisa 1aad iyo 2aad ee Lifaaqa 2aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo u qoran sidan:

Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:

- 1) Uu Kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-Ku-xigeenka goobta codbixinta (ahna labada hubiye kooda ugu da’da weyn), si uu u hubiyo in uu yahay kaadh cod-bixineed oo sax (valid) ah, isagoo ka hubinaaya tilmaamaha kaadhka cod-bixiyaha liiska cod-bixiyeyaasha ansaxa ah. Islamarkaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna faryaradiisa midig, haddii aanu taana lahaynna meelaha muuqda ee jidhkiisa in aanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo Xog-hayaha goobta, iyadoo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiillada Xisbiyadu, haddii ay goobta ku sugan yihiin.***
- 2) Goobta cod-bixineed ee cod-bixiyeyaashoodu ka bataan 750 codbixiye waxa 319loo kala jabinayaa (qaybinayaa) laba sanduuq oo ah A & B.***



Waxaa kale oo la tirtiray\_Qodobka 45aad, Faqraddiisa 2aad iyo 3aad ee Lifaafa 1aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo u qoran sidan:

Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:

2. *Uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha goobta, isla markaana uu hubiyo inay is waafaqsan yihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaan-gashan liiska cod-bixiyeyaashu, dabadeedna uu codbixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska cod-bixiyeyaasha ah ee loogu tala-galay;*
- 3) *Uu tallaabooyinka faqrada sare ee qodobkan ku xusan u gutto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawladeenada iyo wakiilada Axaabta ee goobta codbixinta ku sugani ayaa cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod-bixinta.*

## Qodobka 46aad

### Codbixiyeyaasha aan Codka Dhiiban Karin

Qodobka 46aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeerku waxa uu tilmaamayaa in: **“Haddii uu jiro qof ay naafonimo u diidey inuu codkiisa bixiyo Gudoomiyaha goobta codbixintu u ogolaanayo in cod-bixiye kale oo uu aaminsan yahay uu gacan siinayo oo ka caawinayo sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa”.**

Haddaba, maaddaama uu heerka qoris-akhris la'aanta ee dalkeennu aad u sarreeyo, waxa Qodobkaas lagu kordhiyay:

**“Haddii uu jiro qof waayeel ah ama aan fahmi karahayn halka uu warqadda ka calaaminayo,**

***Gudoomiyaha goobta codbixintu wuxuu amrayaa in qof uu ku kalsoon yahay ama haddii aanu jirinna hawlwadeenada goobtu ay gacan ka siiyaan oo ay ka caawiyaan sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa. Wakiilka Xisbiga/Ururka uu u codaynaayo murashaxiisu goobjoog wuu ka ahaan karaa”.***

### **Qodobka 47aad**

#### **Nidaamka Cod-bixinta**

Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradda 1aad (b & c) ee Lifaaqa 2aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo xusaaya:

***b) kaadhka cod-bixiyaha u gudbinayaa Hubiyaha kale ee goobta;***

***c) xariijin ka tallaabinayaa magaca cod-bixiyaha iyo dhammaan xogta kale ee codbixiyaha ee ku qoran khaanadaha cod-bixiyahaas ee liiska, isagoo adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xarriijin-marinta ka dib.***

Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradda 6aad ee Lifaaqa 2aad oo tilmaamaysa: ***“Codbixiyuhu wuxuu u imanayaa Hubiyaha labaad ee loo soo gudbiyay kaadhkiisa”.*** Qodobka intiisa kale waa la isticmaalayaa marka laga reebo soo gudbinta kaadhka.

Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradihiisa 7aad, 8aad (a,b,c,d,e), 9aad iyo 12aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka oo u qoran sidan hoos ku xusan:

***7) Intaas ka dib ayuu hubiyaha labaad siinayaa cod-bixiyaha kaadhkiisii oo uu dalooliyey, isagoo adeegsadey aaladda loogu tala-galay daloolinta kaadhahka, cod-bixiyuhuna uu si degdeg ah uga baxayaa goobta cod-bixinta isagoo anshaxa dhawraya.***

8) Qof kasta oo ka mid ah hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiiban karaa (isagoo u maraya tallaabooyinka ku xusan 1 – 6 ee qodobkan) Isla marka goobta codbixinta la diyaariyo, ee hawlwadeennada Goobta cod-bixinta iyo wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixintu ay isla hubiyaan in kaadhka qofkaasi yahay mid sax (valid) ah horena aan loogu soo codayn, foomka uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku u soo diyaariyeyna lagu qoro:

a) magaciisa oo afarran;

b) lambarka iyo magaca goobta uu ka diiwaangashan yahay;

c) lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;

d) xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;

e) saxeexa suulkiisa bidixna uu dhigo meesha foomka loogaga talo-galay.

9) Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan faqradda Saad ee qodobkan waxa kaadhkiisa codbixinta haynaya ka dib murkuu hubiyaha 2aad dalooliyo Guddoomiyaha goobta codbixinta oo dib u siin karaa uun ka dib marka la soo gebagebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.

12) Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Guddoomiyuhu wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhkiisu waafaqsan yahay.

Waxaa la tirtiray Qodobka 47aad, Faqradda 13aad ee Lifaaqa 2aad ereyga: **“sita kaadh codbixineed”**.

**Qodobka 51aad  
Tirinta Codadka**

Qodobka 51aad, Faqraddiisa 5aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka, wakiillada Xisbiyada waxaa lagu kordhiyay **“Ururrada”**.

**Qodobka 52aad  
Xidhitaanka Hawsha Tirinta**

- 1) Qodobka 52aad, Faqraddiisa 1aad ee Xeerka oo tilmaamaysa tirada codadka uu helay Xisbi/Urur waxaa lagu kordhiyay **“Murashaxa”**.
- 2) Qodobka 52aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeerku waxa ay waajibinaysaa in dhammaan wakiillada Xisbiyadu/Ururradu ay saxeexaan dhammaan baqshadaha lagu riday agabka doorashada tirinta codadka ka dib.

**Haddaba Qodobkaa waxaa loo beddelay sidan:**

**“Si looga badbaado luminta codadka ay muwaadiniintu dhiibteen, waxa wakiilka Xisbi/Urur ku waajib ah in uu saxeexo buqshadaha ama uu qoraal kusoo gudbiyo sababaha uu u saxeexi waayay laguna rido sanduuqa”**.

**Qodobka 54aad  
Qoraalka Raadraaca Goobta Codbixinta**

Qodobka 54aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka oo ka hadlaaya qoraalka raadraaca goobta codbixinta waxaa loo beddelay sida:

- 1) **Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey Komishanka Doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original) ah iyo kow iyo toban xaashiyood oo nuqullo (copies) ah, iyadoo**

**fagaare ahna waxa Guddoomiyaha Goobtu ku dhawaaqayaa:**

- a) **tirada guud ee ka codaysay goobta;**
- b) **tirada codadka xumaaday;**
- c) **tirada codadka lagu muransan yahay;**
- d) **tirada codadka ansaxay, iyo**
- e) **tirada ay kala heleen**

**Xisbiyada/Ururrada/Musharrixiinta tartamay.**

- 2) **Xaashida asalka ah ee foomka ku xusan faqradda laad ee qodobkan waxa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Gobolka, laba nuqulna waxa lagu ridayaa isla sanduuqa ay ku jiraan baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 55aad(1 iyo 2) ee Xeerka iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmada, sagaalka nuqul ee soo hadhayna waxa la kala siinayaa wakiillada Xisbiyada/Ururrada.**

### **Qodobka 57aad**

#### **Tirinta Codbixinta Degmada**

- 1) Qodobka 57aad, Faqradihiisa 2aad iyo 3aad ee Lifaafa 2aad oo tilmaamaya sida natiijada loogu diiwaangelinaayo Xisbiyada/Murashaxiinta, waxaa lagu kordhiyay **“Ururrada”**
- 2) Qodobka 57aad, Faqradihiisa 8aad, 8aad (e) iyo 9aad waxaa loo bedelay sida:

**8) Wuxuu isu geynayaa natiijada doorashada ee dhammaan goobaha cod-bixinta ee degmada, waxaanu natiijada raadraaca doorashada ee degmada ku qorayaa foomka loogu tala-galay oo ka kooban xaashi asal ah iyo kow iyo toban xaashiyood oo nuqullo ah, iyadoo fagaare ahna wuxuu ku dhawaaqayaa:**

*e) tirada ay kala heleen*

*Xisbiyada/Ururrada/Musharrixiinta tartamay;*

**9) Wuxuu u dirayaa Xafiiska Doorashada ee Gobolka xaashida asalka ah ee raadraaca natiijada doorashada Degmada oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee goobaha degmada iyo nuqulladdii natiijooyinka dhammaan goobaha degmadu, laba nuqulna wuxuu ku ridayaa sanduuqa, sagaalka nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada Xisbiyada/Ururrada ee Xafiiska Doorashada Degmada.**

### **Qodobka 58aad**

#### **Shaqada Xafiiska Doorashada ee Gobolka**

- 1) Qodobka 58aad, Faqraddiisa 2aad iyo isla Faqradda 2aad, xarafka (d) ee Lifaaqa 2aad ee ka hadlaaya Xisbiyada waxaa lagu kordhiyay **“Ururrada”**
- 2) Qodobka 58aad, Faqraddiisa 3aad ee Lifaaqa 2aad ee ka hadlaysa Xafiiska Doorashada ee Gobolka, waxaa loo beddelay sida:

**a) Wuxuu natiijada raadraaca doorashada ee gobolka ku qorayaa foomka ku xusanfaqradda 2 ee qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo ah;**

**b) Xaashida asalka ah, oo uu ku lifaaqan yahay nuqul ka mid ah natiijada doorashada ee degmo kasta oo gobolka ah, wuxuu u dirayaa Maxkamadda Sare;**

**c) Laba nuqul, oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolkuna, wuxuu u dirayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;**

**d) Sagaalka nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada Xisbiyada/Ururrada ee Xafiiska Doorashada Gobolka.**

## Qodobka 62aad

### Hubaal-celinta Doorashada Degaanada iyo Dacwadaha


Qodobka 62aad, Faqraddiisa 2aad ee Xeer Lr. 20/2001 oo qoraysa Soo Gudbinta Dacwadaha ku saabsan Doorashada Deegaanka waxaa loo beddelay sidan:

2. *Dacwadaha ku saabsan Doorashada Deegaanka waxaa awood u leh Maxkamadda Gobolka, waana in dacwaddaasi ay soo gaadho Kaalinta Maxkamadda Gobolka 7 (todoba) maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta ay Xafiisyada heer Degmo ee Komishanka Doorashooyinka Qaranku ay soo saaraan go'aannada doorashooyinka deegaannada sida ku cad Qodobka 61aad ee Xeer Lr. 20/2001. Cabasho kasta oo ka dambaysa muddada Qaanuuniga ahi waa waxba kama jiraan (null and void).*
3. *Maxkamadda Gobolku waa in ay ku go'aan qaadataa muddo 10 (toban) cisho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta ay cabashadu soo gaadhay kaalinta Maxkamadda Gobolka ee ay khusayso. Dhinac kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka Maxkamadda Gobolku waa in ay racfaan qaadashadooda diiwaangeliyaan isla marka xukunka lagu dhawaaqo. Waa in ay racfaan qaadashadooda ku diiwaan-geliyaan muddo 2 (laba) cisho gudahood ah oo ka bilaabanta isla maalinta ay Maxkamaddu ku dhawaaqday go'aanka. Maxkamadda Gobolku waa in ay muddo 2 (laba) cisho ah ugu soo gudbiso Maxkadda sare. Haddii ay isla maalintaa racfaan qaadan waayaan, xaq uguma laha in ay dacwadoodu u gudubto Maxkamadda Sare;*
4. *Go'aannada Maxkamadda Gobolka waxaa looga racfaan qaadanayaa Maxkamadda Sare oo ah Maxkamadda Destuuriga ah. Maxkamadda sare waa in ay muddo toban cisho gudahood ah (10 cisho) kusoo saartaa xukunka iyo natiijada kama dambaysta ah.*

## Qodobka 66aad

**Adeegsiga iyo Dhaqan-galka Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 iyo Lifaaqyadiisa**

Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 iyo Lifaaqyadiisa 1aad, 2aad, iyo 3aad waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Sharci Dejintu ansixiyaan ee uu Madaxweynuhu saxeeexo.

  
C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Golaha Wakiilada



**QAYBTA LABAAD:**

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO**

**DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

JSL/M/XERM/249-1214/072012

17/07/12

**XEER MADAXWEYNE Lr:**

**0249/072012**

# **Cafis Madaxweyne**

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka Ciqaabta Guud (Cafis gaar ah);
- Markuu Dhageystay: Codsigii ay soo jeediyeen Odayaasha iyo Waxgaradka ka socday dhinaca Maxbuus Cismaan Aw Maxamuud (Buurmadow);
- Markuu La Tashaday: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;

**Wuxuu Soo Go'aansaday**



In laga bilaabo maanta uu cafis gaar ahaaneed (Pardon) u fidiyo Maxbuus Cismaan Aw Maxamuud Buurmadow, kaasoo Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex ku xukuntay hal sanno oo xadhig ah taariikhdu markay ahayd 08/07/2012.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1226/072012

28/07/12

**XEER MADAXWEYNE Lr:**

**0252/072012**

# Cafis Madaxweyne

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka Ciqaabta Guud;

Markuu Arkay: Qoraalka Codsiga ah ee ay soo qoreen Isuduwaha Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka Togdheer iyo Agaasimaha Cisbitaalka Burco;

Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay arrintani  
khusayso;

Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed (Pardon) u fidiyo Cabdi Daahir Gaas, kaasoo ku xidhan qaybta Maxaabiista Cisbitaalka Gobolka Togdheer.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/WM/222-1234/072012

29/07/12

Ku: Dhamaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda ee  
Madaxa Banaan -Hargeysa-

Ujeedo: Fulinta Siyaasadda Maamulka Gaadiidka  
Dawladda

Markaan Dhegeystey: Doodii Golaha Wasiirada ee Fadhigii  
75aad ee 05/07/2012 oo ku saabsanayd  
Qorshaha ilaalinta iyo Daryeelka  
Gaadiidka Dowlada ee ku  
taariikhaysnayd 24/05/2012 ee uu  
Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud,  
Guriyeynta iyo Gaadiidku soo hor-  
dhigey Golaha, kana warbixiyey  
kaalinta Wasaarada Hawlaha Guud,

Guriyeynta iyo Gaadiidku ku leedahay fulinta siyaasadda maamulka gaadiidka dawladda;

Markaan Tixgeliyey: Go'aanka uu Golaha Wasiiradu Fadhigiisii 22aad ee 13/01/2011 ku ansixiyey Siyaasadda Maamulka Gaadiidka Dawladda;

Markaan Arkay: Oodobka 90aad ee Dastuurka Qaranka ee qeexaya in Madaxweynuhu "uxilsaaran-yahay hab-sami-u socodsiinta maamulka dowlada";

### Waxaan soo Saaray

Wareegtadan hoos ku faah-faahsan ee lagu fulin doono Siyaasadda Maamulka Gaadiidka Dawladda.

Waxa lagu wargelinayaa dhamaan masuuliyiinta Qaranka ee waraaqdani ku socoto, in laga bilaabo taariikhda Wareegtadan soo baxdo, loo raaci doono fulinta Siyaasadda Maamulka Gaadiidka Dawladda nidaamkan hoos ku cad:

1. Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidku waxa ay u xilsaaran tahay ilaalinta iyo daryeelka hantida gaadiidka dawladda.
2. Waxa la xadidey dhaqdhaqaaqa gaadiidka dawladda wixii ka dambeeya saacadaha shaqada, marka laga reebo inta haysata fasaxa dhaqdhaqaaqa gaadiidka dawladda ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidku bixiso.

3. Waa in Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidku, sida u qorsheysan dhakhso u dhamaystirto dhamaan baahiyaha hoosada gaadiidka dawladda haday tahay dhisme iyo haday tahay qalab farsamo intaba.
4. Xarunta Hoosada Gaadiidka Dawladda ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka ayaa fulin doonta dhamaan adeegyada asaasiga ee Gaadiidka dawladdu u baahan yahay.
5. Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka ayaa maamuli doonta hawsha, qiimeynta iyo tayeynta aqoonta iyo xirfada Darawalada Gaadiidka Dawladda iyadoo la kaashanaysa Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.
6. Waa in Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidku ku darsataa qorshaha ku-talo-galka sannadka 2013 ee la xidhiidha Siyaasadda Maamulka Gaadiidka Dawladda arrimahan hoos ku cad:
  - a. In ay maamusho kharashka sub-head-ka daryeelka gaadiidka dawladda.
  - b. In ay maamusho kharashka sub-head-ka iibka qalabka spare parts-ka gaadiidka dawladda.
  - c. In ay maamusho nidaamka xil-gudashada iyo Gunnooyinka mushaharka darawalada Dawladda.
  - d. In Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidku qaadato farsamo-yaqaanada ka dhiman oo (10) ah.

e. In Wasaarada Hawlaha Guud ku darsato qorshaha kharashka iibka qalabka waaweyn ee farasamada.

AllaaMahadLeh,

AxmedMaxamedSilanyo  
MadaxweynahaJamhuuriyadda Somaliland

**QAYBTA SADEXAAD:**

**DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA,  
AMARADA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA  
WASIIRADA, IWM**

**Date: 30-06-2012**

**Ref: WM/02/08-01/ /2012**

Ku: Dhamaan Wasaaradaha/Hay'adahaDawladda -Hargeysa-  
Og: Dhamaan Agasimayaasha Waaxaha W/Maalayadda-Hargeysa-  
Og: Xisaabiyaha Guud ee Dawladda -Hargeysa-  
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda -Hargeysa-  
Og:Wasiir-Dawlaha Wasaaradda Maaliyadda -Hargeysa-  
Og: Madaxweynaha J.S.L -Hargeysa-

**Ujeedo: Shuruudaha Cashuur-Dhaafka:**

Waxa jirta in baryahan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladu ay Wasaaradda Maaliyadda u soo gudbiyaan cashuur-dhaaf xad-dhaaf ah, kuwaas oo intooda badan aanay sharciga waafaqsanayn taas oo aan u arko inaanay Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladu haysan shuruudaha cashuur-dhaafka ee sharcigu ogolyahay.

Sidaas awgeed; waxaan masuuliyinta Wasaaradaha iyo Hayadaha dawlada ee warqadu ku socoto lagu wargelinayaa in ay ku dhaqmaan liiska warqadan ku lifaaqan oo ah ku sharcigu ogol yahay.

Waxaan idinka rajaynayaa in aydaan noo soo qorin qodobo ka baxsan kuwa sharciga ogol yahay ee halkan ku lifaaqsan.

Allaa Mahad Leh

**(C/casiis Maxamed Samaale)**  
**Wasiirka Wasaaradda Maliyadda**

Lifaaq

The following goods shall be exempted from import duties on the conditions specified:

- 1) Objects belonging to foreign sovereigns or heads of state who come to stay in Somaliland on a basis of reciprocity,
- 2) Objects and motor vehicles belonging to Diplomatic and consular agents accredited  
To the Somaliland republic ,on the basis or reciprocity .objects necessary for the initial establishment of diplomatic an consular office and motor vehicles and other objects for official use ,on the basis of reciprocity .
- 3) Objects and motor vehicles belongs to the representative, officials and expert of the United Nations Organization, its

specialized Agencies and other International Organization in accordance with Agreements ratified by law.

Objects and motors Vehicles for official use of the United Nations Organization ,its specialized Agencies and other International Organisation and objects and motor vehicles necessary for the execution with agreements ratified by law . except for more comprehensive concessions under Agreements converted in foreign Governments or International Organization ,for the execution of bilateral technical assistance programs in Somaliland.

The exemptions are granted by the Ministry of Finance with prior authorization from the Ministry of foreign affairs.

Customs permits the sale or other disposal of objects or Motor Vehicles imported duty free to persons or for purposes other than the originally stipulated after payment of import duties dues on the basis of the value of the objects or Motor Vehicles at time of their sale or disposal.

- 4) Personal belongings ,Furniture, Radio receivers, Sound Recorders Cameras, Cinematographic cameras and Projectors (88mm)Firearms .Typewriters and Sewing Machines ,Household Items Professional Tools and Instruments excluding Motor-Cars belonging to persons taking up residence in Somaliland for whatever reasons, provided the Items are all used and not excessive in relation to the status of the person concerned .

The goods may be imported in separate shipments within Six Months from the date of the person's arrival in Somaliland.

Exemption shall be granted by the customs authorities on submission of an application together with an itemized list of the Goods to be imported in one or more

Shipments, and also a residence certificate issued by Municipal Authorities or equivalent document.

- 5) Travelers' personal belongings portable Furniture, Radio , Cameras, Cinematographic(8mm)Sewing Machines and Typewriter and instruments ,and the small provision of Books , Bed and Table linen they bring with them ,provided the items are all used and are not excessive in relation to the status of the persons concerned.
- 6) Clothes used theatrical props and operatic scores which Actors Singers bring with them entertainers used Instruments and performing animals for public performances. Exemption shall be granted on submission to the customs authority of an itemized of the foregoing articles.
- 7) Objects used in religious worship which are sent to religious mission and communities in the Republic
- 8) Publications and other objects donated directly to cultural Institutes or Organizations and to be used for Scientific or cultural purpose.
- 9) Samples of goods provided they are on directly utilizable.
- 10) Publications ,Diaries, Calendars, Booklets, Postcards , Posters ,Metal palates, Albums ,Illustrated and other Catalogues, and Price lists to be distributed free of charge to advertise tourism or business .
- 11) Stamps, stamped papers, Banknotes and other Instruments of credit.
- 12) Goods imported directly by the government or purchased after their arrival but before they are cleared through the customs. In the later case, exemption shall be granted only on submission of an authorization issued by ministry of finance.
- 13) Materials required for organizing the Desert Locust survey for use in the anti Locust Campaign and for the Malaria eradication Campaign
- 14) Gifts and aid in kind to population struck by public disasters.
- 15) Artificial limbs and invalid wheel chairs
- 16) Materials to be used exclusively by the blind imported by Organizations for assistance to or re-education of the blind, or institution attached to them.



- 17) Machinery, partsthereof, and Ship building Materials for Ships Sailing under any flag.
- 18) Selected domestic Animals, male and female, for breeding and domestic animals to be used in Agriculture.
- 19) Live trees and other Plants, Slips, Cuttings, Tubers, selected Seeds for field and Garden Corps , Fertilizers and Parasitic-ides to be used exclusively for Agriculture, provided they are imported directly by the Agricultural establishment concerned or their exclusive Agricultural use is proved.
- 20) Professional fishing equipment for fishing, but not equipment for fishing as a sport.
- 21) Ship's Store Exclusive monopoly goods, for the exclusive use of passengers and crews to be used during the voyage and while the Ships are in port and roads subject to the guarantees and limitations laid down by the customs authorities.
- 22) Packing Materials and packing of any kind needed for transport of fruit or vegetables to be exported, subject to the guarantees laid down by the custom Authorities.
- 23) Jars, Cans and other containers for food staffs to be exported, subjectto the guarantees laid down by the customs Authorities.
- 24) Fuels and lubricants for servicing of
  - a) Ships leaving or operating outside the territorial water.
  - b) Aircraft leaving with destiny abroad including those making intermediate stops in the Somaliland territory.
- 25) Confines and urns containing remains deceased persons transported to Somaliland and ornament there fore .Exemption shall be granted by the customs Authorization issued by the relevant Authority
- 26) Wreaths and ornaments for gravers in Somaliland
- 27) Goods of proven Somaliland origin such exemption shall be granted to the owner of the goods on behalf of whom the export was effected ,subjected to submission of the export customs clearance document and provided the are the re-imported within one year from the date shown on the document .

## **Article 21**

The following Goods shall be exempt from export duties subject to the conditions specified:

- 1) Personal belonging ,Furniture, Radio receivers, Sound Recorders Cameras, Cinematographic Firearms .Typewriters and Sewing Machines household furnishing belongings to persons taking up residence abroad for any reason ,provided the items are all used are not excessive in relation to the status of the person concerned
- 2) Travelers personal belongings firearms, cameras ,cinematographic cameras (8mm)sewing machine and typewriters ,furnishing and portable Instruments, and the small provision of Books , and Bed and table linen they take with them ,provided the items are all used and are proportionate to the owner's status .
- 3) Ship's stores for the use of passengers and crews of ships in ports or roads of the Republic ,subject to the conditions laid down by the customs authorities
- 4) Postal Parcels up to value SH.SL 50(fifty).
- 5) Coffins and urns containing remains of deceased persons to be sent abroad, and ornaments therefore, subject to prior authorization by the relevant Authorities.

## **Article 22**

### **Stamp Duty (2)**